

# MASHRUUCA DHISMAHA HIAWATHA AVENUE (HWY 55)

## GUUDMARKA MASHRUUCA

Hiawatha Avenue inta u dhaxaysa I-35W iyo Hwy 62 waxa ay u baahantahay in dib loo daamureeyo iyo sadex buundo ee aagga mashruuca ayaa waxa ay u baahan yihiin in la dayactiro. Mashruuca waxaa loo kala qaybin doonaa laba qaybood, qaybta waqooyi laga bilaabo Downtown Minneapolis (faras magaalaha Minneapolis) ilaa 32nd Avenue iyo nuska koonfureed laga bilaabo 32nd Avenue ilaa Hwy 62. Shaqada waxaa la qaban doontaa laga bilaabo guga ilaa dayrta 2022.

## SOO KOOBIDDA SHAQADA

- **Dib u daamuraynta Hiawatha Avenue inta u dhaxaysa I-35E iyo Hwy 62**
- **Dayactirka 3 buundo**
  1. Wadada Hiawatha Avenue ilaa 7th Street
  2. Waddada 8th Street illaa Hiawatha Avenue
  3. Hiawatha Avenue dhanka u socda koonfurta Franklin Avenue dushiisa
- **Hagaajinta u fududaynta naafada ee isgoysyo badan**

## SAAMAYNTA DHISMAHA

### Gu'ga 2022 illaa Xagaaga 2022

*Xasuusin: Qiyaasta waqiyada xiritaanku waa wakhti qiyaas ah oo waa la bedeli karaa.*

#### Xiritaanka Wadooyinka

- Hiawatha Avenue dhanka u socda koonfurta inta u dhaxaysa Faras Magaalaha Minneapolis iyo Cedar Avenue ayaa waxay xirnaan doontaa 4 bilood
- Wadada Franklin Avenue ee hoosta Hiawatha Avenue ayaa waxay xirnaan doontaa ilaa 12 maalmood
- I-35W xiritaan maalmaha dhammaadka usbuuca ah (sabtida iyo axada) si looga saaro buundo
- Hiawatha Avenue dhanka u socda koonfurta inta u dhaxaysa Cedar Avenue iyo 32nd Street ayaa waxay xirnaan doontaa 2 todobaad
- Hiawatha Avenue dhanka u socda waqooyi inta u dhaxaysa Lake Street iyo 26th Street ayaa waxay xirnaan doontaa 2 todobaad

#### Xiritaanka meelaha laga galo jidweynaha

- I-94 dhanka u socda bari illaa Hiawatha Avenue dhanka u socda koonfur ayaa waxay xirnaan doontaa 4 bilood
- Waddada 8th Street (laga bilaabo faras magaalaha Minneapolis) illaa dhanka koonfureed ee Hiawatha Avenue ayaa waxay xirnaan doontaa 4 bilood
- I-35W dhanka u socda koonfurt illaa Hiawatha Avenue dhanka u socda koonfur ayaa waxay xirnaan doontaa 4 bilood Hiawatha Avenue dhanka u socda waqooyi illaa faras magaalaha (7th Street) ayaa waxay xirnaan doontaa 4 bilood
- Hiawatha Avenue dhanka u socda waqooyi illaa I-35W dhanka u socda galbeed ayaa waxay xirnaan doontaa 3 todobaad
- Hiawatha Avenue dhanka u socda waqooyi illaa I-35W dhanka waqooyi u socda ayaa waxay xirnaan doontaa 3 todobaad
- Hiawatha Avenue dhanka u socda waqooyi illaa 3rd Street iyo Washington Avenue ayaa waxay xirnaan doontaa hal bil

### Dabayaaqada Xagaaga 2022 ilaa Dayrta 2022


*Xusuusin: Xiritaannadu isku mar ma dhacayaan. Qiyaasta waqiyada xiritaanku waa wakhti qiyaas ah oo waa la bedeli karaa.*

- Qaybo ka mid ah Hiawatha Avenue dhanka u socda koonfur inta u dhaxaysa 32nd Street iyo Hwy 62 waa la xiri doonaa 10 maalmood
- Qaybo ka mid ah Hiawatha Avenue dhanka u socda waqooyi inta u dhaxaysa 62 iyo 32nd Street waa la xiri doonaa 10 maalmood

### Mashaariicda Dhismaha ee ka Agdhow

Mashruucyada soo socota ayaa ka dhici doona agagaarka dhisitaanka Hiawatha Avenue. Horey u sii qorsheyso oo la soco haddii aad u safarto meelahan.

- Hiawatha Avenue inta u dhaxaysa I-35E iyo Bloomington Road
- Hwy 77 inta u dhaxaysa Hwy 62 iyo webiga Minnesota River



## FAA'IIDOOYINKA MASHRUUCA



In la simo dusha jidka



Beddelka caaladaha ee 35th Street iyo 38th Street



Buundooyinka muddo raagaya



Biyo-mareenka oo la hagaajiyay gudaha aagga mashruuca



Badbaadada iyo u fududaynta naafada ee isgoysyada

### La soo xiriir

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo si aad isugu diiwaan geliso in aad email ku hesho wixii soo cusboonaada boogo:

[www.mndot.gov/metro/projects/hwy55minneapolis](http://www.mndot.gov/metro/projects/hwy55minneapolis)

Noogu soo dir email:

[Connect@Hiawathaconstruction.com](mailto:Connect@Hiawathaconstruction.com)

Fariin noogu dhaaf qof ka tirsan kooxda mashruuca ayaa kugu soo celin doona:

[612-464-4005](tel:612-464-4005)